



Kobcinta Muddada Foojignaanta

1. Diyaarinta Jawi Hufan:

- a. Dooro meel deggan ee qolka dhexdiisa ah.
- b. Ka fogoow waxyaabaha ku dhibaaya: I) demi T.V. ii) isticmaal aragti aan laga gudbi karin: sida khalfadaha la saarto buugagga iyo kursiga fadhiga.
- c. Abuuridda goob shaqo ee ku filan kursiga ubadka iyo miis yar (sida miiska qaxwada ama miiska ubadka).
- d. Icticmaal saxan ama goob si loo helo meel ku filan shaqada.
- e. Diyaari alaabta lagu ciyaaro inta ubadka miiska imaan.
- f. Icticmaal alaabta lagu ciyaaro ee dhammeystiran (fiiri sharxida soo socota). Tusaale, isdhexgeli xujooyinka Buzzulka, xirmaha is dhexgala iyo muuqaal qaaybiyaha.

2. Dhiirigelinta Ubadka ee ka Qaybgalka Ciyaarta:

- a. U samee ubadka astaan uu ku garto in aay tahay wakhtiga ciyaarta bilaabanaysay sida: digniin afka ah iyo dhaqdhaqaaqa jirka.
- b. Sii ubadka hal qayb ee ciyaarta sida xirmo furo ama hal sawir ee hawsha lagu qabto miiska.
- c. U hees hal hees marka aad ubadka u hogaaminayso goobta ciyaarta sida: “Waa wakhtigii la fariisan lahaa goobta” iticmaal naaxyada “The Farmer in the Dell”.:

3. Wakhtiga Ciyaarta

- a. Si aad u tusto ubadka waxa uu sammeyn lahaa, waxaad marka hore dhammeystirtaa qayb waxa la qabanaayo, tusaale, waxaad marka hore dhigtaa qayb ka mid ah xujooyinka buzzulka.
- b. Haddii ubadku u baahanyahay taakuleyn ee dhammeystirka howsha, waxaad siisaa caawimaad marka u baahanyahay, sida gacantaada korsaar gacantisa ee ku hag howsha la qabanayo.
- c. Si tartiib ah ugu kordhi tirada wakhtiga ee ubadka looga baahanyahay inuu la fadhiyo qof weyn. Ku bilow wakhti gaaban, sida 30 ilbiriqsi.
- d. Haddi ubadku uu doonaayo inuu ciyaarta sii wato, u oggolow inuu ku celiyo hawshaasi.
- e. Haddii ubadku lumiyo xiiseynta ka hor ama kadib waqtiga loogu talagalay inuu ku dhammeystiro, waxaad u dhaaftaa iyada/isaga inuu sameeyo hal qayb, kadibna ha wada dhamaystiro. Tani waxay ubadka uga dhigaysaa ciyaarta mid wanaagsa, waxayna bareysaa in xadkaani uu dhigay qof weyn.